## Warbixin kusaabsan horumarinta daryeelka iyo caafimaad ajaanibta

Natiijadii kasoo baxda baaritaankan ayaan ku ogaan karnaa xog muhiim ah oo ku saabsan caafimaadka dadka ajaanibta ah.

### Muhiimadu waa in la hor mariyaa daryeelka dadka ajaanibta ah iyo qoyskooda

- kobcinta hormarinta caafimaadka iyo sidii loo yareyn lahaa sinaan la'aanta caafimaadka
- si looga caawino isdhexgalka, shaqaaleysiinta iyo shaqoqabashadu iney hirgasho
- si awood loo saaro adeegyada gaar ahaaneed kuwa sida aadka ah loogu baahanyahay

Xogta baaritaanku waxay sahlaysaa, in laga hortago dhibaatooyinka shaqasiinta la xiriirta, waxaa kaloo baahidooda lagu dabooli karaa, meelaha u baahan, si ka duwan sidii hore.

### Baaritaanka dadka ka qayb qaata

- waxay ogaanayaan xaaladooda caafimaad
- waxaad saamayn ku yeelanaysaa, adeega mustaqbalka ay heli doonnaan adiga, qoyskaaga, iyo dhammaan dadka wadanka u soo guura

Dhamaan dadka ka qayb qaata baaritaankan dhexdooda qof ayaa ku guuleysan doonaa hadiyad.



MAAMU

## Warbixin dheeri ah

Anu Castaneda
baarekhaas ah
p. 020 610 8597

Shadia Gaily
iskuduwaha mashruuca
p. 020 610 8537

Mulki Mölsä
dhakhtarka cilmibaarista
p. 020 610 8718

cinwaanka emailyada: magaca.awowga@thl.fi

### telefoonada lacag la'aanta ah

Kurdi p. 0800 140 011
Soomaali p. 0800 140 012
Ruush p. 0800 140 013

### Maamu Facebook
www.facebook.com/maamututkimus

Maamu-cilmibaarista waxaa maalgeliyey KELA (Kansaneläkelaitos), Euroopan sosiaalirahasto (ESR) iyo Työsuojelurahasto (Maahanmuuttajan onnistuminen työssä -projekti).

Qaybaha wada shaqeynto nagala dhexeyso waa Wasaarada Soshalka iyo caafimaadka, Työterveyslaitos iyo magaalooyinka cilmibaarista lagu qabanayo.

Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

Vipuvoimaa EU:lta 2007–2013

TERVEYDEN JA HYVINVOINNIN LAITOS

www.thl.fi/maamu

# Cilmibaarista caafimaadka iyo daryeelka dadka ajaanibta ah Maamu



MAAMU

# Waa maxay Maamu-cilmibaarista?


Maamu-cilmibaarista waa baaritaankii ugu horeeyey ee bulshada Finland, taasoo lagu aruurinayo macluumaad, gaar ahaan dadka Finland uga soo guuray dibada ee qaangaarka ah caafimaadkooda iyo daryeelkooda bulsho.

Baaritaankan waxaa sameynaya hey'da caafimaadka iyo daryeelka bulshada (THL), taasoo ku soo bandhigta baadhitaano kala duwan caafimaadka iyo daryeelka bulshada Finishka, mashruuca dhanka shaqada waxaa diyaarisay hay'ada caafimaadka shaqada (Työterveyslaitos).

**Terveyden ja hyvinvoinnin laitos** waa waax hoostagata wasaaradda sooshaaka iyo caafimaadka oo u qaabilsan baaritaanka iyo horumarinta, taasoo shaqadeedu tahay iney horumariso bulshada caafimaadkeeda iyo daryeelkeeda

**Työterveyslaitos** waa laanta wadanka u qaabilsan horumarinta shaqada iyo shaqaalaha

### Si muhiimadii baaritaanka loo gaaro waa in qof kasta oo baaritaankan loogu yeero ka qeyb qaataa waad mahadsantahay!



Seppo Koskinen
hogaamiyaha mashruuca, dhakhtar sare,
profeesor sare
Terveyden ja hyvinvoinnin laitos (THL)

**MAAMU**

# Yaa loogu yeerayaa baaritaankan?

Waxaanu baadhitaanka ugu yeerayaa jinsiyidaha ka soo kala jeeda Somalida, Raashka iyo Kurdida, ee qangaarka ah.

Baaritaanka waa lagu doorankaraa, hadii aad 18–64 sano jir tahay, ku dhashay Soomaliya, Ruushka (ama midowgii hore ee Sovietka), Iraan ama Ciraaq ku dhalatay luuqadaada hooyona tahay afafka wadamadaas looga hadlo. Xataa dadka Ruushaka ku dhashay, laakin afkooda hooyo yahay finnishak waa ka qeyb qaadan karaan. Qofku, waa inuu degenaa Finland ugu yaraan muddo halsano ah.

Dadka la baarayo magacyadooda si ku nasiibi ah ayaa looga soo qaadanayaa xaafiiska diiwaangelinta, taasoo natiijadi kasoo baxda baaritaankan ay bixineyso sawir ku aadan caafimaadka dadkaas.

### Waraaqaha waxaa loo dirayaa 3000 oo dadkii loo doortay ah baaritaankan, kuwaasoo la waci doono markiiba waraaqaha ay helaan.

Dadka ka qeyb qaadanaya baaritaanka waxaa warbixin dheeraad aha lagu siinayaa afkooda hooyo. Macluumaadka la aruuriyey waa mid si taxadar leh loo daryeelayo. Baaritaanka waxaa loo sameynaya loona kaydinayaa, si aan shaqsishaqsi loo ogaan dadka ka qayb qaatay.



**MAAMU**

# Sidee loo sameynaa baaritaanka?

Baaritaanku waa laba qeybood: wareysi iyo baaritaan caafimaad.

## Wareysiga

Wareysiga waxaa lagu qabanayaa meeshii ku haboon qofka la wareysanayo, tusaale ahaan, gurigiisa ama xarunta THL. Waraysi qaadayaasha iyo kalkaaliso caafimaadku waxay kugula hadlayaan luuqadiina hooyo, Soomaali, Ruush iyo Kurdi.

Waraysiga waxaa lagu weydiinayaa
- caafimaadka iyo jirooyinka
- hab nololeedka
- khibrada aad u leedahay bixinta iyo helista gargaarka bulsho ee aad u baahantahay

## Baaritaanka caafimaadka

Baaritaanka caafimaadka waxaa lagu sameynayaa xurunta caafimaadka magaaladaada waana lacag la'aan.

Baaritaanka caafimaadka
- waxaa la cabirayaa, dheerarka, miisaanka, cabiraada dhiiga, pulssi, hemoglobiini iyo wareega miskaha iyo dhexda
- afka iyo ilkaha xaaladooda ayaa la baarayaa
- awooda murqaha ayaa la baarayaa
- baaritaanka dhiig ayaa la qaadayaa, taasoo lagu ogaanayo dhiiga sokorta, duxda dhiiga ku jirta, habka beerku u shaqeynayao iyo hadii infekshan jiro.

## Baaritaanka waxaa laga sameynayaa
- Helsinki sanadka 2010–2011
- Vantaa iyo Espoo 2011
- Tampere, Turku iyo Vaasa sanadka 2011–2012

**MAAMU**